



# HAGISTA DEGGANAHA

## Tusmada

<b>Macluumaadka xiriirka:</b> .....	1
<b>Dacaytirka guryaha:</b> .....	1
<b>U soo guuritanka:</b> .....	2
<b>Furayaasha.....</b>	2
<b>Koontaroolidda guriga:</b> .....	2
<b>Degganaanshaha.....</b>	3
<b>Iskaashiga dadka deegaanka.....</b>	3
<b>Shrciyada u yaala guriga:</b> .....	4
<b>Baarkinka.....</b>	5
<b>Xayawaanka la xannaaneysto .....</b>	5
<b>Adeegga furitaanka albaabka.....</b>	5
<b>Bixinta kirada:</b> .....	5
<b>Joojinta heshiiska guriga.....</b>	6
<b>Nadaafadda iyo qashinka.....</b>	6
<b>Dayactirka iyo derbyada wax ku dhejinta .....</b>	6
<b>Dayactirka dhismaha:</b> .....	7
<b>Cosdiyada adeegga:</b> .....	7
<b>Hawada iyo teknolojiyada dhismaha.....</b>	7
<b>Nadiifinta oogu dambeysso ee guriga .....</b>	9
<b>Hagista nadiifinta ugu dambeyso guriga:</b> .....	9

## Macluumaadka xiriirka:

Pudasjärven Vuokratalot Oy

Varsitie 7

93100 Pudasjärvi

050-409 8190

asuntotoimisto@pudasjarvi.fi

[www.pudasjarvenvuokratalot.fi](http://www.pudasjarvenvuokratalot.fi)

## Xilliga uu xafiiska furan yahay:

Isniinta iyo jimcaha 9-12

Talaadada iyo Khamiista 12-15

## Dacaytirka guryaha:

Kiinteistöhuolto Riekki Oy


Arrimaha degdega ah taleefanka:

**0400- 687 234**

Waxaad wici kartaa 24 ka saac

Arrimaha aan degdeg aheyn wargelinta adeegyada:

[www.pudasjarvenvuokratalot.fi](http://www.pudasjarvenvuokratalot.fi)



**PUDASJÄRVEN  
VUOKRATALOT OY**

## U soo guuritanka:

Kireystaha guriga ayaa samaynaya wargelin usoo guuridda guriga. Wargelinta usoo guurka waxaad ku sameyn kartaa taleefanka **2095 535 535**, ama internetka cinwaanka [www.muuttoilmoitus.fi](http://www.muuttoilmoitus.fi) ama si qoraal ah boostada waxaad ka heleysaa foomka usoo guuritanka guriga.

Qofka guriga ijaartay ayaa iskiis u samaysanayo heshiiska korontada kambaniga uu doono.

Qofka guriga ijaartay waa inuu geliyaa caymis dhibaatada uu geysto, kuwa guriga laga ijaartay caymiskooda kaama kabayo alaabta guriga. Caymiska kama dhimayo xuquuqda magdhowga kireystaha.

## Furayaasha

Furayaasha guriga bannaan waxaas ka qaadanaysaa xafiiska guryaha, ama haddii si gooni ah loogu heshiiyey inaad ka qaadato qofkii degganaa. Inta aadan furayaasha qaadan waa inaad keentaa caddaynta deebaajiga iyo heshiiska guriga oo saxiixan.

Guri kasta waxa uu leeyahay ugu yaraan seddex fure. Kireystaha guriga uu ka dalban karaa fureyaal dheeraad ah xafiiska guryaha. Kireystaha ayaa bixinaya kharashka ku baxa furayaasha dheeraadka ah. Dhammaan furayaasha oo dhan xitaa kuwa dheeraadka ah ee aad kharashkooda bixisay waxaad kusoo celinaysaa xafiiska guryaha.

Haddii ay furayaasha lumaan waa in sida oogu dhaqsaha badan oogu soo sheegtaa xafiiska guryaha, si aan dhibaato kale u dhicin. Furayaasha guriga waxa ay kaloo furaan meelaha laysla wada wadaago. Furayaasha lumay iyo cusbooneysiintooda iyo baddalaada meesha uu furo waxaa qarashkeeda bixinaya qofka deggan guriga.

## Koontaroolidda guriga:

Qofka marka uu guriga u soo guurayo waxaa la siinayaa foomka koontaroolidda guriga. Foomka waa in markaad guriga u guurto buux buuxisaa, kuna soo celisaa ugu dambeyn seddex maalmood gudahood. Foomka koontaroolidda guriga waxaad ku soo qoreysa xaaladda guriga sida uu yahay markaad kireysatay, iyo dhammaan ciladaha uu leeyahay

Haddii gurigu uu leeyahay cillad ama uu jaban yahay, oo aadan soo sheegin markay kirada kuu bilaabatay, waxaa loo arkayaa in cilladaas ama jabniinkaan uu ku yimid intaad degganeyd guriga. Kireystaha ayuu saaran yahay magdhowga dhammaan dhibaatada iyo jabniinka ku yimaadda guriga inta uu deggan yahay.

Haddii kireystuhu uu ku arko dhibaato ama jabniin guriga waa in uu islamarkiiba u soo sheegaa xafiiska uu ka kireystay. Si fudud oon dhib ahay wargelinta waxaad ku sameyn kartaa shabakadda guryaha ijaarka ah ee Pudasjävi. Haddii ay qasabad ama tuumbo ay biyo siideynayaa, ama ay jiraan xaaladda degdeg ah waa inaad islamarkiiba soo wargelisaa qaybta dayactirka guriga ee heegan ka ah.

Dhibaatada degdegga ah ee jirta markaas ayaa sida oogu dhaqsaha badan loogu samaynaya. Dayactirka kale waxaa la samaynaya marka dayactirka sanadlahaa ah la samaynayo.

## Degganaanshaha

Iskaashiga dadka deegaanka.

Sharciga maareynta iskaashiga guryaha kirada (1990/649).

Iskaashiga dadka deegaanka macneheedu waa ka qayb qaadashada wax wada qabadka dadka deegaanka wada deggan. Pudasjärven vuokratalot Oy ayaa sannad walba qaban qaabiya shir ay oogu yeeraan dhammaan dadka deggan guryaha ijaarka ah. Shirkaas waxaa looga wada hadlaa sida qorshaha dhaqaale kambaniga sannadka soo socda oogu talagaleen, dayactirka iyo hagaajinta la sameyn doono, habkii loo samayn lahaa, iyo hadallada ay soo jeediyaan dadka guryaha deggan.

Shirka sannadlaha ah ee dadka degaanka deggan waxaa suurtagal ah in shirkaas ay ku doortaan guddi cusub oo iyaga matala. Guddigaas la doortay ee matala dadka deegaanka waxa ay saameyn ku leeyihin go`aanka ay gaaraan kambaniga, iyo weliba dayactirka iyo hagaajinta dhismaha lagu samaynayo. Dhaqaale ahaan waan caawineynaa guddiga matala dadka deegaanka.

### Bogga dadka deegaanka

Waxaan bilownay in aan isticmaalno bogga dadka deegaanka. Beejka dadka deegaanka waxaad cusbooneysiin kartaa macluumaadkaaga, waxaad halkaas ka heleysaa warbininadii oogu dambeeyay, waxaad kaloo farriin oogu diri kartaa qaybta adeegyada guryaha ijaarka ee Pudasjärvi, waxaad kaloo ku wargelin kartaa hadday guriga wax ka xumaadaan ama ka jabaan. Beejka dadka deegaanka waxaad ka arki kartaa heshiiskaaga, lacagta kirada aad bixisay ama lagugu leeyahay, warqadda biilkha ijaarkana waad kasoo saaran kartaa. Beejka waxaad si toos aha oogu bixin kartaa lacagta ijaarka.

Maadaama beejka lagu isticmaalayo macluumaad aaminaad ah, waa in aad marka kuugu horeysa is diiwaan gelisaa isticmaashaa sirta lagu galo oo adag. Kadib waxaad ku geleysaa sirtii aad sameysatay. Beejka dadka degaanka waxaad ka geleysaa cinwaankan internetka

[www.pudasjarvenvuokratalot.fi](http://www.pudasjarvenvuokratalot.fi)



## Shrciyada u yaala guriga:

Marka aad saxiixdid heshiiska guriga waxaad ballanqaaday in aad ku dhaqmaysid xeerarka iyo shrciyada u yaal Pudasjärven Vuokratalot Oy, waana in aad ka taxadartaa in dadka qoyskaaga kamidka ah, iyo martidaada ay ku dhaqmaan shrciyada iyo xeerarka. Haddii aad ku dhaqmi weysid xeerarka iyo shrciyadaas waxay saameyn ku sameyneysaa in heshiiskaaga guriga la burburiyo.

- 1§ Dhammaan dadka guriga usoo guuray ama deggan waa in lasoo wargeliyaa dadka idin ka kireeyey guriga.
- 2§ Kireystaha guriga waa in ka taxadaraa nadaafadda iyo daryeelka guriga, uuna ku dhaqmo shrciyada iyo xeerarka guriga.
- 3§ Kireystuhu iskiis uma dayactirikaro ama dib u habeyn kuma sameyn karo dhismaha. Hadday wac dhacaan ama ay wax jabaan waa in aad sida oogu dhaqsaha badan oogu soo sheegtaa dadka guriga kaa kireeyey.
- 4§ Kireystaha waa in uu soo wargeliyaa kireeyaha haddii uu guriga cidleenayo in ka badan siddeed wiig
- 5§ Kireystaha guriga u ma degganaan karo si dhibeysa dadka kale. Waa in layska ilaaliya qeelada iyo waxa dadka dhibaya qaasatan saacadaha u dhexeeya 22-07. Waa in dariska la sii wargeliyaa haddii aad sameysaneyso dhacdo keeneysa qaylo iyo sawaxan
- 6§ Garaacidda hurgufidda rooggaa iyo waridda dharka waa in aad ku isticmaashaa goobaha loogu talagalay. Garaacidda iyo hurgufidda rooggaa waxaa wanaagsan in aad sameyso saacadaha u dhexeeya 8-20. Haddaad balakoonka ku hurgufeysid ama dhar ku waraneysid ku samee balakoonka dhexdiisa gudaha darbiga.
- 7§ Waa ka mamnuuc sigaar ku cabidda gudaha, balakoonka, iyo goobaha lawada isticmaalo.
- 8§ Balakoonka in aad wax ku dubataa waa mamnuuc.
- 9§ In aad dab ku shido meelo loogu talagalay meel aan ahayn waa mamnuuc.
- 10§ Kireystaha waa in uu daryeelaan nadaafadda baqaarka uu gurigaaga leeyahay. Guriga meelaha la wada wadaago sida jarjanjara, aqalka qaybta hoose, iyo marinada kore lama dhigan karo alaabta guriga.
- 11§ Gaadiidka waxaa la dhigi karaa oo kaliya baarkinada loogu talagalay. Gaadiidka in la dhigo guriga hortiisa iyo marinada loogu talagalay gargaarka degdegga waa ka mamnuuc. Kuwa guriga iska leh waxa ay xaq u leeyihiin in ay ku ganaaxaan haddii aad gaadiidka dhigtid meel qaldan. Gaadiidka aan diiwaan gashaneen, kuwa la tuuray, iyo qalabkooda waa ka mamnuuc in lagu kaydiyo ama la dhigo barxadda guriga.
- 12§ Waa in uu xayawaankaaga uu xarig kuugu xiran yahay markaad la joogto meelaha dadku joogaan, aadna nadiifisaa qashinka ama saxarada xayawaankaaga. Kireysto

walba waxaa ku waajib ah magdhaw waxa uu xayawaankiisa geysto. Xayawaanku ma aha in uu dhibo dariska.

13§ Ridista rashka ama bululeerka barxadda guriga waa ka mamnuuc.

### **Bakhaarka iyo keydinta alaabta:**

Guri walba waxaan isku dayeynaa in aan u qabanqaabino bakhaar gurigiisa u dhow.

Sababaha nabadgelyada dabka awgeed alaabta waxaa lagu keydin karaa oo kaliya meelaha loogu talagalay. Alaabta dadka dhaliya iyo waxyaalaha qarxa waa ka mamnuuc in lagu kaydiyo guriga, bakhaarka iyo meelaha dadku wada wadaagaan.

### **Baarkinka**

Guri walba waxaa suuragal ah in uu kireysan karo hal boos oo baarkinka baabuurta ah. Haddii kireystuhu uu u baahan yahay wax kabadan hal boos oo baarkin ah waxaan oogu qabanqaabinaa sida suurtagalka ah. Biilka baarkinka waxaa lagu bixinaya oo uu la socdaa biilka ijarka guriga. Booska barkinka waxaa laga kireynaya oo kaliya baabuurta iyo mootoojinka diiwaan gashan ee sida joogtada ah loo isticmaalo. shirkadaha lama siinayo meel gooni ah oo ay ku keydiyaan xamuulka la jiido, gaariga aqalka ah, mootoojinka, ama mootoojinka barafka la wato.

Martida waxa ay baabuurka dhigan kartaa booska martida loogu talagalay. baarkinada martida waxaa loogu talagalay in ay dhigtaan waqtii yar. Gaadiidka waxaa la dhigi karaa oo kaliya goobaha loogu talagalay. Iska ilaali oo ka fogow in aad barxadda guriga baabuur ku wad wadaa si ay u noqoto goob badbaado ah si wanaagsanna loogu noolaan karo. Kambaniyada qaaska ah ee ilaaliya baarkinada ayaa ilaalinaya barxadda iyo baarkinada. Haddi qofka ganaax la siiyo, oo uu u arko in ganaaxan uu qalad yahay oo si qaldan loo ganaaxay waa in uu arrinta kala xaajoodaa qolyihii ganaaxay.

### **Xayawaanka la xannaaneysto**

Kireystaha ayaa mas`uul ka ah dhibaatada ay geystaan xayawaankiisa. Dhammaan xayawaanada waa in ay xarig ku xiran yihiin marka la joogo barxadda la wada wadaago.

Haddii xayawaanka uu geysto dhib ama uu halleeyo guriga, barxadda bannaanka, waxaa magdhawgiisa leh qofka xayawaanka leh. Xayawaanka la xannaaneysto ma aha in uu dhibo dariska. Qofka xayawaanka le waa in uu saxarada xayawaankiisa ka aruuriya ama ka qaadaa barxadda. Guriga dhabarkiisa bannaakana waa in laga nadiifiyaa saxarada xayawaanka.

### **Adeegga furitaanka albabka**

Albabka haddii laguu furayo waxaad wacda oo ka dalbataa dayactirayaasha heegganka leh. Furitaanka albabka waa lacag hadba qiimaha furitaanka siduu yahay. Dayactirayaasha guriga ayaa biilka furitaanka albabka kuusoo diranaya. Qofka albabka loo furayo waa inuu haystaa aqoonsi uu ku caddeynayo in uu guriga deggan yahay.

### **Bixinta kirada:**

Biilka waxa uu dhacaya bishii hal mar. Kireystaha waxaa loo soo diraya biilasha guriga sannad walba. Markaad kirada bixineysid isticmaal lambarka tixraaca biilka.

Haddii aadan biilka kirada ku bixin karin maalintii laguu qabtay waa inaad la soo xiriirta kireeyaha guriga. Biilka daaha waxaa waxaa lagugu soo dallacyaa dulsaarka biilka.

Haddii kireystuhu ay ku ururro biilal badan oo kirada ah kireeyaha guriga waxa uu bilaabayaa in uu guriga kaa saaro sida sharciga guryaha la kireysto uu dhigayo. Biilasha kirada aan la bixin iyo ka saaridda guriga waxaa laga dalbanayaa maxkamadda dhexe ee Oulu.

Guryaha kirada waxaa suuragal ah inaad lacagta kirada ay kuu oggolaato Kelada. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan lacagta kirada waxaad ka heleysaa Kelada [www.kela.fi](http://www.kela.fi).

Caddaynta warqadda guriga ama caddaynta mas`uulka dhismaha waxaad ka heleysaa xafiiska guryaha.

### Joojinta heshiiska guriga

Heshiiska aan lahayn waqtiga cayiman waxaad joojin kartaa xilliga loogu talagalay wargelinta ka bixidda heshiiska. Waxaad heshiiska joojin kartaa bil kahor waqtiga joojinta. Muddada ogeysiiska joojinta heshiiska waxaa laga xisaabinaya maalinta oogu dambeysa bisha kalandarka ee ogeysiiska la bixiyey. Joojinta heshiiska waa in marwalba uu noqdaa warqad ahaan.

### Nadaafadda iyo qashinka

Markaad nadiifineysid aqalka waa inaad raacdaa tilmaamaha nadiifinta qalab walba.

Goobta qashinka waa inaan la geeynin alaabta guryaha, mashiinada guriga, ama waxyaalahaa qatarta keena. Goobta qashinka waxaa loogu talagalay oo keliya qashinka guriga. Alaabta guriga, qalabka korontada ku shaqeeya iwm waa inaad geysaa goobaha loogu talagalay ama halka lagu ururiyo si markale loo isticmaalo.

Qaybta qashinka waxaa yaal weelal loogu talagalay qashinka la gubi karo iyo kan haraaga cuntada. Haraaga cuntada iyo qashinka ka dhasha cuntada, si toos ah looguma tuuri karo goobta qashinka, waa inaad ku xirtaa bacda qaaska ah ee loogu talagalay ama warqadaha joornaalka ku duubtaa.

Waxaa lagu talinayaa in si gooni ah loo kala guro warqadaha, baakadaha, iyo gasacadaha biraha ah. Meelaha la geeyo alaabtan waxaad ka hubsan kartaa beejka internetka ee magaalada

Pudasjärven. <http://www.pudasjarvi.fi/asukkaille/asuminen-ja-rakentaminen/jatehuolto/hyotyjatteet>

### Dayactirka iyo derbiyada wax ku dhejinta

Guriga dayactir kama sameyn kartid adoon ogoolaansho ka helin kireeyaha guriga. Haddii kireystuhu uu rajaynayo in laga sameeyo dayactirka sannadlaha ah, waa inuu ku soo weydiistaa shabakada kambaniga.

Haddii uu kireystuhu doonayo in uu guriga wax ku rakibo (tusaale ahaan katabaan gaanjo, ama meel wax la saarto) darbiyada qoyaanka leh, waa inuu la soo xariiraa xafiiska guryaha.

Xirfadleyaasha xafiiska guryaga ijarka ee Pudasjävi ayaa darbiga kuugu dhejinaya. Kharashka ku dhejinta waxaa bixinaya Kireystaha.

Alwaaxa daaqadaha iyo albaabada kuma dhejin kartida wax dhaawac ku reebaya.

## Dayactirka dhismaha:

Dayactirayaasha dhismaha ayaa qaabilsan jaridda cawska goobaha la wada wadaago. Haddii kireystuhu gurigiisa uu leeyahay deer ama daarad isaga u go an waa in uu isagu daryeelaa goynta iyo jaridda cawska daaraddiisa. Haddii daaradda ama barxadda dadka ka dhaxeyso lagu abuuray geedo leh miro la cuni karo, mirahaas waxa ay ka dhexeeyaan dadkoo dhan.

Xilliga barafka shaqaalaha dayactirka dhismaha ayaa barafka ka xaaqaya albaabka hore iyo barxadda ama bannaanka. Shaqaalaha dayactirka dhismaha ayaa ka taxadaraya meelaha la wada maro in aysan noqon meel sabiibax ama lagu siibto.

## Codsiyada adeegga:

Codsiyada ku saabsan guriga waxaa sahlan in aad internetka ka sameysid gal cinwaankan  
[www.pudasjarvenvuokratalot.fi](http://www.pudasjarvenvuokratalot.fi)

Codsiyada waxaa ka mid ah tusaale ahaan hiiarka kuleylka, wax aad dooneyno in laguu sameeyo iwm. Codsiga waxaa la falanqeeyaa maalin kasta, waxaana lala xariiraa kierystaha.

Wax yaalaha degdegga ah sida biyo daadanaya ama waxyaalaha u baahan in degdeg loo qabto soo wac taleefanka dayactirayaasha heegganka leh **0400-687 234**.

## Hawada iyo teknolojiyada dhismaha

**Hawada:** Guri walba waxa uu leeyahay hab u gooni ah oo hawa qaadidda iyo keenidda ah. Kireyste walba isaga ayaa geysan kara cabirkka hawada uu u baahan yahay. Habka loo isticmaali mashiinka hawada waxaad ka heleysaa galka ama faylka tilmaan bixiyaha isticmaalidda mashiinada guriga yaal. Dayactirayaasha dhismaha ayaa sannad walba baddalayo shaandhada hawa qaadaha, markaas waxa ay nadiifinayaan mashiinka hawa qaadista. Duleelada ay hawada kasoo galaan ama ka baxaan waxaa qashinka laga nadiifiyaa sannadkii 5.10 jeer.

**Teknolojiyada guryaha:** Guriga saacadda cabirta biyaha, iyo qalabka kale ee teknolojiyada guriga meesha ay ku yaalaan waxa ay ku xiran tahay hadba guriga siduu yahay. Saacadda cabirta biyaha waxay ku taali kartaa guriga afka hore dhulka waxaa saaran dabool, ama darbiga, goobta qubeyska, jikada ama sawdanada alwaaxda hoostooda. Kireystuhu waa in uu usoo sheegaa kuwa guryaha leh lixdii bilood mar qoraalka saacadda biyaha, marka ay kusoo weydiyaan.

**Dab ama qiiq sheegaha:** Dhammaan guryaha ijaarka ee Pudasjärven Vuokratalot Oy waa in guri walba uu lahaadaa dab ama qiiq sheegaha, kireystaha ayaana soo iibsanaya, oo mas`uuliyadda saaran tahay. Waajibaadka in uu shaqaynayo dab iyo qiiq sheegaha waxa uu saaran yahay kireystaha.

## Ka guurista guriga

Guriga iyo bakhaarkaba sidii lagu faray waa in aad u nadiifisaa. Kula hishii kireeyaha guriga in uu kaa firiyoo ama kaa koontoroolo guriga inta aadan ka guurin guriga. Haddii uu guriga wax ka jaban yahay soo sheeg marka aad dheheysid waan ka guurayaan guriga.

Hubso in dhammaan nalalka, bareesyada saqafka kuyaal, iyo bahasha dadka iyo qiiqa sheegta in ay meeshooda ku yaalaal, ayna shaqaynayaan. Wuxaan kugu soo dalaceynaa lacag haddii saqafka kore bareeska nalka ka maqan yahay. Gurigaaga baqaarkiisa kana qaad alaabta oo dhan. Hubso in

dhammaan nalalka uu gurigu leeyahay aysan jabneen gulubkana uu ku jiro. Guriga ma aha in ad wax alaabtada ah aad kaga tagtaa. Waxaan kugu soo dalaceynaa lacag qaadista aan qaadnay haddii aad guriga kaga tagto nalal iyo alaab.

Markaad guriga faaruqisid ood nadiifisid soo celi dhammaan furayaasha oo dhan. Haddii maalinta aad guureyso ay kusoo aaddo sabti ama axad, waa in aad maalinta ka horeeya soo celisaa ugu yaraan hal fure ama aad arrinta kala heshiisaa kuwa guriga kaa kireeyey. Furayaasha waxaa markasta lagu soo celinaya xafiiska guryaha. Heshiis aad adiga iyo kireeyaha wada gaarteen oo kaliya ayaad furaha ku siin kartaa qofka kale ee usoo guurayo.

Lacagta lagaa hayo, iyo deebaajiga waxaa laguu soo celinaya marka guriga lagaa hubiyo, guuritaankaaga iyo saacadda biyaha la fiiriyo bil kadib guuritaankaaga. Haddii guriga laga helo meel jaban, haleysan ama wax ka maqan yihiin nadaafadda, waxaan ka jaraneynaa lacagtaan hadba qiimaha lagu dalacdo ijaarleyda sida uu yahay.

Kireystaha ayaa is diiwaan gelinayo xafiiska is diiwaangelinta iyo xafiisyada kale (tusaale ahaan Kelada). Kireystaha ayaa iska xiraya heshiiska korontada marka aad guureysid. Heshiiska korontada waxaad ku ekeyneysaa ama xireysaa maalinta guriga heshiiskiisa kuugu dambeysos.

# Nadiifinta oogu dambeysa ee guriga

Haddii markaad guureyso aadan sameyn nadaafadda oogu dambeysa ama aad u sameyso si aan wanaagsaneyn, waxaan kugu soo dallaceynaa lacagtii lagu nadiifiyay.

Hagista nadiifinta ugu dambeysa guriga:

- **Goobta qubeyska, saunada, iyo godka musqulaha**
  - o Dhaqista dhulka, derbiyada, murayadaha, goobta saxarad, saxanka wajidhaqa iyo alwaaxda lagu fariisto saunada
  - o Tirtir ama masax dhammaan armaajootinka oo dhan gudohooda iyo korkooda
  - o Godka biya qubeyska ay galaan nadiifi
  - o Nadiifi dabinada urta celiya saxanka weji dhaqqa hoostiisa
- **Daaqadaha iyo meelaha hawada qaada**
  - o Meydh ama dhaq dhammaan dusha daaqadaha. Xilliga qaboobahaa daaqadda muraayadda dibadda xigta ma u baahna in aad meertaa ama dhaqda.
  - o Huufaree dhammaan meelaha hawada qaada
- **Jikada**
  - o Tirtir ama masax dhammaan armaajootinka oo dhan gudohooda iyo korkooda
  - o Meydh ama dhaq caagga qashinka
  - o Nadiifi foornada, saxamada foornada, birta foornada iyo shooladda ama makiinadda cunta kariska. Sidoo kale nadiifi dhinacyada iyo korka shooladda ama makiinadda cunta karinta.
  - o Dhalaali oo nadiifi talaajadda iyo qaboojiyaha. Sidoo kale talaajadda korkeeda. Albaabka talaajadda ha wada xirin.
  - o Nadiifi makiinadda cunta karinta korkeeda shabaqa qiiq qaadaha
- **Qolalka jiifka iyo qolalka kale ee guriga**
  - o Tirtir ama masax dhammaan armaajootinka oo dhan gudohooda iyo korkooda
  - o Tirtir ama masax dhammaan darbiga iyo dhulka alwaaxyada isku haya korkooda
  - o Huufaree dhulka kuna tirtir ama ku masax maro aan qoyaan badan laheyn
  - o Tirtir ama masax albaabka laga soo galo iyo albaabka dhexe
  - o Dhammaan darbiyada iyo armaajoojinka ka fuji istiikarada iyo waxa aad ku dhejisay
- **Baqaarada keydinta**
  - o Ka faaruqi baqaarka dhammaan qashinka iyo alaabta
  - o Ka xaaq dhulka dhammaan qashinka iyo boorka
  - o Hubsi in aysan alaab kaaga harin baqaarka la wada dhigto alaabta dibadda.
- **Barxadda**
  - o Waa in aad ka fujisaa barxadaada haddaa deer kuxiraya ama wax kale, waa haddaa ku sameysatay.
  - o Ka nadiifi barxadaada qashinka (saxarada xayawaanka, haraaga sigaarka, iwm.)

## Liiska qiimaha lagu soo dalacanayo kireystayaasha

<b>Arrinta</b>	<b>Magdhaw</b>	
Nadiifinta		38 €/saacaddii
Dayactirka iyo dib u habeynta, waxaa lagugu soo dalacaya shaqadii la qabtay.		40 €/saacaddii
Faaruqinta qolka		40 €/saacaddii
Ka qaadista qalabka guriga / alaabta guriga ee kireystuhu ka tagay		50 €/qalabka guriga/alaabta guriga
Faaruqinta lacagta oogu yar ee lagugu soo dacalayo		120 €/saacaddii
Nalka saqafka kore	Waxaan kugu dalaceynaa shaqada la qabtay, qiyastii 20-100	€/nal kasta
Mashiinka dhar dhaqista makiinadda biyaha kululeeya afka hore ee qasabadda		10 €/xabbaddii
Mashiinka dharka dhaqa xarigga biyaha qaada meesha uu ku shubo daboolkeeda		5 €/xabbaddii
Bareeska korontada		40 €/xabbaddii
Salladda ama weelka dharka wasaqda lagu rido		30 €/xabbaddii
Baddalaada albaabka dhexe		150 €/xabbaddii laguugu rakibayo
Hiitarka ama kuleeliyaha meesha laga dheereeyo lagana gaabiyo		35 €/xabbaddii
Cusbooneysiinta godka fadhiga musquusha		420 €/xabbaddii laguugu rakibayo
Haanta biyaha godka fadhiga musquusha		160 €/xabbaddii laguugu rakibayo
Cusbooneysiinta daboolka godka fadhiga musquusha		60 €/xabbaddii laguugu rakibayo
Baddalaada saxanka gacmo dhaqashada		200 €/xabbaddii laguugu rakibayo
Mashiinka alaabta dhaqa xarigga biyaha qaada meesha uu ku shubo daboolkeeda		21 €/iskuxiraha
Alaabta/saxanka gacmo dhaqashada furka ama daboolka		15 €/xabbaddii
Qanadaha albaabka qabiijiyaha/firiisarka qaanadihiisa		40 €/xabbaddii
Birta/saxanka foornada kuukarka		25 €/xabbaddii
<b>Dab ama qiiq sheegaha:</b>		30 €/xabbaddii
Birta lagu furo daaqadaha		10 €/xabbaddii
Nalalka mashiinada guriga (tusaale nalka kashidma qaboojiyaha iyo foornada) iyo nalalka dhaadheer		10 €/xabbaddii

Baddalaada sakatuurooyinka (marwalba waa la baddalaya, haddii aadan soo celin furayaasha oo dhan)	Waxaa lagugu sii dalacayaa hadba wixii la sameeyey qiimahooda		
Haddaadan soo celin furaha barkinka		10	€/xabbaddii
Gambaleelka ama jalaska		30	€/xabbaddii laguugu rakibayo
Lacagta furitaanka albabka	30€/50€		hal mar saacadaha shaqada/waqtiyada kale
Alaabta guriga ku rakiban	Waxaa lagugu soo dalacayaa hadba wixii la sameeyey qiimahooda		
Kharashka kubaxa dayactirka/nadiifinta sigaarka awgeed	Waxaa lagugu soo dalacayaa hadba wixii la sameeyey qiimahooda		
Soo wargelinta joojinta heshiiska guriga		95	€/xabbaddii

**PUDASJÄRVEN VUOKRATALOT OY SHAXDA SIDA LOO KALA LEEYAHAY MAS`UULIYADDA DAYACTIRKA  
AHA DIB U HABEYNTA GURYAH A KIRADA AH**

Shirkadda waxay mas'uul ka tahay oo keliya kharashka dayactirka ee ku xaddidan waxa sida caadiga ah u duugooba ama u jeexjeexma, oo aan ahayn burburka kale ee guriga / alaabta guriga. Qofka guriga deggan wawa uu MARKASTA mas'uul ka yahay dhibaatada falka uu sameeyo ka timaada (wax la jebiyay, ku tagrifalid, dayacaad iwm.). Liiska waxaa kaliya oo lagu xusay howlaha ugu badan ee u baahan dayactirka ama daryeelka, waxaa jiri kara waxyaabo gaar ah. Waajibaadka kierystaha waa in wax walba oo ka jaba ama ku yimaada guriga oo samaynteeda kireeyaha ku waajib ah waa inuu sida oogu dhaqsaha badan u wargeliyaa dayactirayaasha. Waa in ISLA MARKAAS la wargeliyaa si dayactirka loogu sameeyo dib u dhicid la'aan.

\*- meelaha la calaameeyey samayntood waxaa kaliya oo sameyn kara xirfadle idman

PVT = Pudasjärven Vuokratalot Oy

	<b>Shaqada ama mas`uuliyadda waxqabada</b>	<b>Mas`uuliyadda kharashka</b>	
<b>Dayactirka qufulka ama sakatuurada asalka ah</b>	PVT	PVT	
<b>Dalbashada fureyaal dheeri ah</b>	PVT	kireystaha	Kireeyaha ayaa haddii loo baahdo kuu dalbaya fureyaal dheeri ah qarashkana waxaa bixinaya kireystaha.
<b>Baddalaada qufulkaama sakatuurada albaabka bannaanka</b>	PVT	kireystaha	Baddalaada furayaasha uu lumiyay kireystaha
<b>Rakibidda ama dayactirka qufulka ama sakatuurada amniga</b>	kireystaha*	kireystaha	Ooga tag guriga si bilaash ah. Dayactirayaasha qufulka ama sakatuurada amniga hal fure.
<b>Rakibaada silsiladda badbaadada ee albaabka iyo wax yaalaha tuugga celiya</b>	kireystaha*	kireystaha	Ooga tag guriga si bilaash ah.
<b>Xeydh ama saliideynta biraha albaabka haya</b>	kireystaha	kireystaha	Albaabada qolalka
<b>Dayactirka ama laallaaddaa cinjirada</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka qalabka shooladda iwm.</b>	PVT	PVT	
<b>Dhaqidda ama meeridda daaqadaha dhinaca bannaanka</b>	kireystaha	kireystaha	Haddi ay daaqadaha furmaayan. Shirkadda ayaa mas'uul ka ah nadiifinta dusha sare ee daaqadaha aan furmeynin.
<b>Dhaqidda ama meeridda daaqadaha dhinaca gudaha</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Cusbooneysiinta muraayadda daaqadda</b>	PVT	PVT	
<b>Rinjiyeynta iyo dayactirka alwaaxyadooda</b>	PVT	PVT	
<b>Xeydh ama saliideynta biraha albaabka haya</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta iftiin celiyaga</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Dayactirka iftiin celiyaha</b>	PVT	PVT	Kuwa ku yaala. Kireystaha ayaa iskiis u soo gadanaya.

<b>Xeydh ama saliideynta biraha albaabka iyo sakatuurooyinka</b>	kireystaha	kireystaha	Albaabka gudaha
<b>Dayactirka albaabada iyo qalabkoodii asalka ahaa</b>	PVT	PVT	
<b>Rinjiyeynta alwaaxyada albaabka</b>	PVT	PVT	
<b>Rinjiyeynta darbiyada</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka darbiyada goobaha qoyan</b>	PVT	PVT	
<b>Rinjiyeynta saqafka kore</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka iyo cusbooneysiinta waxyaalahda dhulka korkiisa ah.</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta joogtada ah ee sida saxda ah ee dhulka korkiisa</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Rinjiyeynta alaabta guriga</b>	PVT	PVT	
<b>Hagaajinta alaabta guriga</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta joogtada ah ee goobaha qoyaanka ah</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Qalajinta si taxadarka leh goobaha qoyaanka ah isticmaalidda kadib</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Si fiican u eegidda darbiyada goobaha qoyan, soo wargelinta haddaan wax ku aragtay</b>	kireystaha	kireystaha	Tusaale xabagta looga celiyo in ay biyaha ka dusaan, goobta qubeyska caagga dhulka ku goglan
<b>Dayactirka dusha darbiyada balakoonka</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta balakoonka</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta balakoonka duleelada ay biyaha ka baxaan</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta nalalka saqafka kore iyo shabaqyada</b>	PVT	PVT	
<b>Hawo ka siideynta hiitarada kulaylka keena iyo cabiraadooda</b>	PVT	PVT	
<b>Hagaajinta iyo samaynta Meesha hiitarka kulaylka laga geeyo cabiraadda</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta balakoonka</b>	kireystaha	kireystaha	Hiitarka kulaylka meesha cabirkka laga geeyo lama qarin karo lagamana saari karo
<b>Nadiifinta meelaha hawada qaada</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Hagaajinta iyo samaynta meelaha hawada qaada</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta meelaha hawada qaada</b>	PVT	PVT	

<b>Nadiifinta meelaha hawada qaada</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Baddalaada shaandhada meesha ay hawada ka soogaa</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta iyo huufareynta shaandhada mashiinka kulaylka ee hawada</b>	kireystaha	kireystaha	Talo soo jeedin ah 1 jeer/1 bil
<b>Kormeer xilliyeed ah mashiinka kuleylka hawada</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta shaandhada dufanka miiraha ee kuukarka cuntada korkiisa</b>	kireystaha	kireystaha	Talo soojeedin uguyaraan 4 mar/sannadkii
<b>libsashada iyo baddalaada shaandhada cusub dufanka miiraha ee kuukarka cuntada korkiisa</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka dufan qaadaha kuukarka wax lagu kariyo korkiisa ku yaal</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta iyo badelidda shaandhada mashiinka hawada ee guriga</b>	PVT	PVT	
<b>libsashada shaandhada mashiinka hawada ee guriga</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka iyo samaynta mashiinka hawada ee guriga</b>	PVT	PVT	
<b>Isticmaalidda hadba sida loogu baahan yahay mashiinka hawada ee guriga</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Xaaqidda iyo nadiifinta meesha qaadda qiiqa dabka</b>	PVT	PVT	
<b>Nadiifinta afka hore ee tuubooyinka ama qasabada</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Xakamaynta aasaasiga ah ee hab qulqulka tuubooyinka ama qasabada</b>	PVT	PVT	
<b>Cusbooneysiinta xarigga tuumbada ama qasabadda qubeyska iyo tan gacanta</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka iyo cusbooneysiinta tuubooyinka ama qasabada</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka musquusha iyo saxanka waji dhaqa</b>	PVT	PVT	

<b>Ku rakibidda iyo ka furitaanka mashiinka alaabta dhaqa iyo gufeynta duleelka</b>	kireystaha*	kireystaha	Kireystaha ayaa mashiinka soo iibsanaya bixinaya kharashka xiritaanka Rakibaadda waa inay rakibaan shirkadda rakibaadda ama xirfad-yaqaanno tuumbo ama qasabad gelinta. Kireystaha marka uu ka guurayo waa in uu ka taxadaraa in la gufeeyey tuumbada ama qasabadda biya keenta iyo meesha ay ku dhacaan biyaha ka baxa mashiinka Haddii meesha uu galayo mashiinka alaabta dhaqa aad ka fujiso alwaax ama armaajo waa in aad meel ku keydisaa, kuna rakibtaa marka aad goobta ka bixisid mashiinka.
<b>Ku rakibidda iyo ka furitaanka mashiinka dharka dhaqa iyo gufeynta duleelka</b>	kireystaha*	kireystaha	Waxaan kugula talineynaa inaad adeegsato shirkadaha rakiba maadaama caymiska gurigu uusan kaa kabeynin ama kaa bixineynin dhibaato ay keentay in aan si sax ahayn loo rakibay. Xusuusnow badbaadada korantada! Waa mamnuuc in aad isticmaashaa xarigga qaybisada bareeska ama fiishka, waana in aad xarigga bareeska mashiinka aad ka bixisaa bareeska ama fiishka marka aad isticmaashid kadib.
<b>libsashada iyo rakibaadda caagga biyaha dhulka ka celiya ee la hoos dhigo mashiinka alaabta dhaqo</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta xarigga tuubooyinka ama qasabadaha</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta godka biya qubeyska ay galaan</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta xarigga tuubooyinka ama qasabadaha iyo godka biya qubeyska ay galaan</b>	PVT	PVT	
<b>Furitaanka marinka bullaacadaha marka ay xirmaan</b>	PVT	PVT	Kharashka furitaanka bullaacada xirma haddii uu sababay kireystaha, kireystaha ayaa bixinaya kharashkaas.
<b>Ilaalinta biyaha ka daadanaya tuubooyinka ama qasabadaha iyo musqlaha</b>	kireystaha	kireystaha	Biyaha daadanaya waa in aad si deg deg ah ku soo wargelisaa
<b>Dhuumaha tuubooyinka ama qasabadaha daadanaya</b>	PVT	PVT	Biyaha daadanaya waa in aad si deg deg ah ku soo wargelisaa
<b>libsashada iyo baddalaada dab dhaliyaha (istaatarka) nalalka dhaadheer</b>	PVT	PVT	
<b>Dayactirka nalalka dhismaha iyo qolofkooda</b>	PVT	PVT	
<b>libsashada iyo baddalaada dab dhaliyaha (istaatarka)</b>	PVT	PVT	

<b>Dayactirka bareesyada ama fiishashka iyo meesha nalka laga daaro</b>	PVT	PVT	
<b>Rakibaadda nalalka qurxinta</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>libsashada iyo baddalaada nalka</b>	kireystaha	kireystaha	Nalalka dhismuhu leeyahay waxaa dayactiraya dayactirayaasha dhismaha.
<b>Keenista iyo baddalaada baariga</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>In aad dib oogu xirtaa bareeska nalka ee saqafka kore iyo daboolkiisa</b>	kireystaha	kireystaha	Bareesyada saqafka kore hadday maqnaadaan adaa kharashka lagugu soo dallaceynaa.
<b>Nadiifinta qalabka qaboojiyaha biyeeya</b>	kireystaha	kireystaha	Talo soojeedin uguyaaran 1 mar/sannadkii
<b>Nadiifinta qaboojiyaha tuumbada dhalaaliso barafka</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Huufareynta cunto qaboojiyaha dhabarkiisa</b>	kireystaha	kireystaha	Bishii hal mar keydinta tamarta iyo badbaadada dabka.
<b>libsashada digniin bixiyaha dabka</b>	PVT	PVT	
<b>Daryeelidda iyo batari badelidda digniin bixiyaha dabka</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta shooladda iyo shooladda , sidoo kale dhinacyada shooladda</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Shooladda ama kuukarka cuntada karisa iyo cunto qaboojiyaha dayactirkiisa iyo daryeeliisa</b>	PVT	PVT	
<b>libsashada xariirinta qadka kumbuyuratk iyo kanalada la daawado oo dheeraadka ah</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Xarkaha ama modeemka keena internetka guriga (Kairan Kuitu -modeemi )</b>	PVT	PVT	Markaad ka guureysid ooga tag guriga.
<b>Daryeelidda iyo dayactirka dhagaxa saunada lagu kululeeyo</b>	PVT	PVT	
<b>libsashada dhagaxda saunada lagu kululeeyo</b>	PVT	PVT	Qofka deggan waxa uu qolyaha dayactiro guriga soo wargelin karaa marka ay habboontahay in dhagaxda saunada kululeeya la baddalayo
<b>Nadiifinta daaradda, cowska iyo geedaha daryeeliiska</b>	kireystaha	kireystaha	
<b>Nadiifinta dadka deegaanka deggan halka ay ka galaan guriga, barafka, dhagax ku daadinta</b>	kireystaha	kireystaha	

Daryeelka cowska iyo geedaha	PVT	PVT	
Baarkinka iyo agagaarkiisa baraf ka xaaqidda iyo dhagax ku daadinta	PVT	PVT	
Daryeelka iyo baraf ka qaadista baarkinkaaga	kireystaha	kireystaha	Mashiinada qandaraaslayaasha ayaa barafka ka xaaqaya barkinka bannaan, marka ay daaradda barafka ka qaadayaan.
Daryelin goobaha ciyarta	PVT	PVT	
Qashinka halista ah ee kireystaha	kireystaha	kireystaha	
Qashinka waaweyn ee kireystaha	kireystaha	kireystaha	Goobta qashinka ma dhigi kartid alaabta guriga iwm.
Gelitaanka caymiska guriga iyo daryeelka	kireystaha	kireystaha	